



Tallaalka lagula

dagaallamo cudurka xaaqada/tbc

Cudurka xaaqada/tbc waa cudur dalal badan caadi ahaan laga helo. Tallaalka lagula dagaallamo cudurka xaaqada/tbc waxaa lagula talinayaa, ilmaha qoysaskooda ka yimi dalalka cudurka xaaqada/tbc u aad ugu badan yahay haddii la barbardhigo Dalka Iswiidan.

Cudurka xaaqada/tbc waa Infeekshan oo sababa bakteeriyeyaal oo faafinta awgeed adeegsada hawad markii qofku u qufaco. Cudurku wuxuu badi ahaan weerar ku qaada sambabada laakin xitaa xubnaha kale ee jirka weerar buu ku qaada. Cudurku xaaladaha badidooda tartiib-tartiib ayuu u kora/waynaada, calaamadahiisuna waa qufac raaga, hoos u dhaca miisaanka iyo qandho. Infeekshanku wuxuu kaloo dhawr sanadood ku hakaan karaa jirka kaddib ayuu soo bixi karaa. Markii cudurka xaaqada/tbc usan firfirconayn ma faafo.

Cudurka xaaqada/tbc waa cudur dalka Iswiidan aad ugu yar. Maadaama ilmaha ay halis dheeraad ugu jiraan in cudurka la qaadsiiyo, ayaa fursadda ka tallaalista la siiyaa, sida tusaale ilmaha waalidiintooda asal ahaan ka yimi dalalka cudurka xaaqada/tbc u ku badan yahay.

Badbaadada tallaalka laga helo waa sidee?

Maaddada tallaalka, ee loo yaqaanno BCG-vaccin, waxay badbaadadiisa ilmaha yaryar ka badbaadadiisa noocyada cudurka xaaqada/tbc ugu halis badan, sida tusaale caabuqa xuub-maskaxeedka iyo tan guud ahaan loogu yeero cudurka xaaqada/tbc oo faafay. Maaddada tallaalka waxay kaloo ilmaha xooga da'da wayn si fiican ugu badbaadadiisa cudurrada sambabaha ku dhaca u sabab cudurka cudurka xaaqada/tbc.

Waxyeellada caadi ma ahan

Sidoo kale dareen-celin halis ah tallaalka- BCG aad ayay u yar yihiin. Waxaa dhicin karto in qofku u dareemmo qandho, madax-xannuun ama nodeyaasha qanjirka kilkilaha soo bararaan. Xaalado aad dhif u ah waxaa dhici karto nabar ka wayn oo muddo dheer ka bogsashada qaadato.

Warbixin dheeraad ma u baahan tahay?

Mar kasta waxaad la xiriiri kartaa rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta ee aad ka tirsan tihiin. Waxaad kaloo warbixin dheeraad ka aqrisan karta:

- 1177.se
- Folkhälsomyndigheten.se
- Lakemedelsverket.se

SIDATAN AYAA LAYSAGA TALLAALA CUDURKA

Tallaalka kahor

Tallaalka kahor waxay kalkaalisada caafimaadka-BHV (kalkaalisada caafimaadka rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta) u baahan tahay warbixin ku saabsan xaalad-caafimaadeedka ilmaha. Qofka ilmaha u ah xilhaayeha xannaanadda/waalidka wuxuu sidaan awgeed ka jawaabi doonaa dhawr su'allood. Isla goortaas wuxuu xilhaayeha xannaanadda/waalidka su'aallo waydiin karaa kalkaalisada caafimaadka rugta daryeel-caafimaadeedka carruurta, haddii u iswaydinayo arrin tallaalka xiriir la leh.

Tallaalka

Tallaalka lagula dagaallamo cudurka xaaqada/tbc waxaa caadi ahaan la siiyaa fursad markii ilmihii qiyaastii ay jiraan lex toddobaad. Maaddada tallaalka iyadoo irbad ah ayaa maqaarka lagu dura, dhinac kor jira ee cududa gacanta bidixda.

Dhacdada tallaalka kaddib

Maaddada tallaalka waxay sababta Infeekshan yar oo maqaarka, kaddib markii laba ilaa afar toddobaad ay ka soo wareegato goortii tallaalka, waxaa badi ahaan dhici karto in halka maqaarka laga duray ay inyar soo adkaato. Adkanshaha way waynaata kaddib midabka guduudka ayay yeelata, muddo kaddib nabar ayay isku rogta oo malax ka soo qulquli karto. Nabarka caadi ahaan isagoo aan la daryeelin waxaa laga bogsada 3-4 bilood. Ilmaha waxaa xilliga boogta lagula talinayaa in ay ku dabaalan barkadaha biyaha.

Qaar ilmaha kamid ah maba yeeshaan wax nabar ah, adkaansho oo keliya oo dhawr bilood kaddib iskeeda u ciribmata.

